



Qofka sooma ramadaanka isaga rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: "Qofka sooma ramadaanka isaga rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qofka sooma bisha ramadaan isagoo Ilaahay qirsan oo rumaysan waajibnimada ramadaanka iyo ajarka iyo abaalka wayn ee Ilaahay u diyaariyey dadka sooman, Ilaahay dartina ula jeeda oo aysan ka ahayn is tustus iyo ha lagu maqlo, waa loo dhaafaa dambiyadiisii hore.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/4196>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

